

STAY SAFE MN

TILMAAMAHA BAARITAANKA COVID-19 EE

CALYADA GURIGA LAGU QAADO

TILMAAMAHAN TALAABO-TALAABO U RAAC, OO XASUUSNOOW:

- Waa inaad keento sanbalkaaga adiga oo raacaaya kormeerka oonleenka ah (muuqaalka aalada Zoom) si baaritaankaaga loo sameeyo.
- Wax ha cun, ha cabin, ha ruugin xanjo, ama ha cabin sigaar muddo 30 daqiiqo ah baaritaankaaga kahor.

1

FURO IYO/AMA GAL CIWAANKAAGA BARTA [COVID.VLT.CO](https://www.covid.vlt.co)

Booqo [covid.vlt.co](https://www.covid.vlt.co) oo adeegso ciwaan iimeel sax ah oo samayso lambar sir ah aad xasuusan karto. Waxaad u baahan tahay in hal mar aad koonto furato Waxaad isticmaali doontaa isla furayaasha gelitaanka markaad baaritaanno dalbanayso mustaqbalka.

2

QAADO KIISHADAADA OO DIYAAR GAROOW

Ha furin baakada tuubada baaritaanka ilaa aad ka gaarto talaabada 4aad. Is oonbixi 1-2 saacadood kahor intaadan baaritaanka qaadin si aad u kordhiso calyada/xandhuf soo saarkaaga. **Wax ha cun, ha cabin, ha ruugin xanjo, ama ha cabin sigaar muddo 30 daqiiqo ah baaritaankaaga kahor.**

3

U TAG ADEEG BIXIYAASHEENA OO GAL BAARITAANKAAGA

Waa inaad keento sanbalkaaga adiga oo raacaaya kormeerka oonleenka ah (muuqaalka aalada Zoom) si baaritaankaaga loo sameeyo. Si aad ula kulanto kormeeraha baaritaanka Vault, booqo [covid.vlt.co](https://www.covid.vlt.co) oo gal barta adoo adeegsanaaya furayaasha gelitaanka ee aad ku samaysatay talaabada 1. Kormeeraha ayaa kugu hagi doona hanaanka qaadista calyada/xandhuufta aad ku shubayso tuubada. Shaqadaan waxay qaadan kartaa dhowr daqiiqadood.

4

DIB U DIR KIISHADA OO HEL NATIIJADA BAARITAANKAAGA

Ku rid tuubada bac difaaca ee lagu siiyay.

Keen bacda difaaca goobta sanbal dhigida uu u qoondeeyay dugsiagaagu.

Waxaad heli doontaa iimeel ka yimid hello@updates.vaulthealth.com kuu sheegaaya natiijadaada 48 ilaa 72 saacadood gudahood laga bilaabo markii sanbalkaagu yimid shaybaadhka.

XOG MUHIIM AH

RAAC TILMAAMAHA QODOBAYSAN

Waa inaad keento sanbalkaaga adiga oo raacaaya kormeerka oonleenka ah (muuqaalka aalada Zoom) si baaritaankaaga loo sameeyo.

HABOONAANTA BAROOWSARKA WEBKA

Fadlan adeegso Google Chrome ama Safari si aad u gasho baraha baaritaanka ee Vault Health. Internet Explorer maaha baroowsar barta laga geli karo, isticmaalkiisuna waxay keenaysaa fashil.

MARKAAD HESHO KIISHADAADA

Akhri galka tilmaamaha ee buluuga ah oo la socda kiishadaada baaritaanka. Ha furin baakada tuubada baaritaanka ilaa in lagugu amro maahee inaad sidaas ku samayso wicitaanka muuqaalka ah aalada Zoom ka.

KAHOR INTAADAN QAADAN BAARITAANKAAGA

Naso 1-2 saacadood kahor baaritaankaaga. Si loo helo natiijooyin sax ah, wax ha cun, ha cabin, ha ruugin xanjo, ama ha cabin sigaar muddo 30 daqiiqo ah kahor baaritaankaaga.

SI SAX AH BAAKAD U GELINTA BAARITAANKAAGA

Markaad dhamayso baaritaankaaga, geli tuubada bacda suunta noolaha ee lagu siiyay. Geli baxda bokiska cad si aad u difaacdo sanbalka la qaadaayo. Bokiska cad ee ku jira baakada caafimaadka.

BAARITAANKA FAYRASKA LAGAA HELO

Vault Health sharciga ayaa qasab uga dhigaaya inay kiisaska laga helay COVID-19 usoo sheegto maamulka caafimaadka gobalkaaga ee ay qusayso. Haddii lagaa helo fayraska, booqo [cdc.gov/coronavirus/2019-nCoV](https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-nCoV) kadibna la xariir dhakhtarkaaga.

WALI MA QABTAA SU'AALO? LA XARIIR VAULT
212-880-5494 | covid@vaulthealth.com | vaulthealth.com/covid



Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 651-201-5000
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

La xariir health.communications@state.mn.us si aad u codsato xogta oo qaab kale ah.

8/27/2020

2 ee 2